DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| | | | |
|---|---|---|---|
| SANADKA 20AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 12/15/20 | Lam. 03 |

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

# SHARCIGA DUGSIYADA QUR'AANKA KARIIMKA AH


| TUSMADA | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Sharciga Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

**Sharci Lr.3 ee December 15, 2020, kuna saabsan Sharciga Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^aad^ farqadiisa 16-^aad^ iyo Qodobka 32-^aad^ farqadiisa 5-^aad^

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/121/2020, kuna taariikhaysan December 9, 2020.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimada Xeerkani u leeyahay dhiiri-gelinta barashada iyo ku dhaqanka Diinta Islaamka.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.**

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/121/2020** **Garoowe, Arbaca ,** **Taariikh:- 09/12/2020**

**Ku: - Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 64-aad

**MARKUU ARKAY: -** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 32-aad farqadiisa 5-aad.

**MARKUU ARKAY: -** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:MW/DPS/MW/ 68/2020 ee May, 11, 2020 kuna saabsanaa Ansixinta Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay in xeer lagu maamulo loo Sameeyo goobaha lagu barto Qur'aanka Kariimka ah.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo go'aankiii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhiga 47-aad Fadhigiisii 9-aad ee **4/11/2020,** Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland oo ay fadhiyeen **44** Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.

**MARKUU ARKAY:-** Go'aankii Golaha Wakiilladu ay cod aqlabiyad ah (**39**) Mudane oo gacan taag ah ku ansixiyeen Xeerka Dugsiyada Qur'aanka kariimka ah ee Puntland, halka uu diidey (**1**) mudane, ayna ka aamuseen (**4**) mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND ★ OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# XEERKA DUGSIYADA QUR'AANKA KARIIMKA AH EE PUNTLAND

GAROOWE, NOFEEMBAR, 2020

# Tusmo

**Bogga**


CUTUBKA 1-AAD: QODOBO GUUD........................................................................

Qodobka 1-aad: Eray Bixin .................................................................................. 4

Qodobka 2-aad: Magaca Xeerka.............................................................................. 5

Qodobka 3-aad: Baaxadda Xeerka........................................................................... 4

Qodobka 4-aad: UJeeddada Xeerka......................................................................... 5

Qodobka 5-aad: Mabaadii'da Guud ee Xeerka ........................................................ 5

Qodobka 6-aad: Madax-Banaanida Dugsiyada Qur'aanka Kariimka.......................... 6

Qodobka 7-aad: Fasiraadda Xeerka ........................................................................ 6

CUTUBKA 2-aad: MAAMULKA DUGSIYADA QUR'AANKA................................................ 6

Qodobka 8-aad: Wasaaradda Cadaaladda................................................................ 7

Qodobka 9-aad: Guddiga Dugsiyada Qur'aanka........................................................ 7

Qodobka 10-aad: Dhismaha Guddiga ....................................................................... 7

Qodobka 11-aad: Waajibaadka Guddiga ................................................................... 7

CUTUBKA 3-AAD: XAFIISKA DIIWAAN-GELINTA IYO RUQSADSIINTA DUGSIYADA QUR'AANKA................................................................................ 8

Qodobka 12-aad: Qaab dhismeedka Xafiiska Diiwaan-Gelinta Iyo Ruqsad Siinta Dugsiyada Qur'aanka ........................................................................................................ 9

Qodobka 13-aad: Diiwaan-Gelinta Dugsiyada.......................................................... 9

Qodobka 14-aad: Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Dugsiyada......................................... 9

Qodobka 15-aad: Habraaca Diiwaan-Gelinta Dugsiyada Iyo Ruqsad-Siintooda...........10

Qodobka 16aad: Reebnaanta Xayeysiisyada dugsiyada aan is-diiwaan Gelin ...............10

Qodobka 17-aad: Laalista Ruqsadaha iyo Habraacooda...........................................13

Qodobka 18-aad: Habraaca Laalidda Ruqsadda Diiwaangelinta Dugsi.......................13

Qoddobka 19-aad: Beddelka Magaca Dugsiga Iyo Habraaciisa.................................14

CUTUBKA 4-AAD: BARE, URURKA BARAYAASHA QUR'AANKA KARIIMKA EE PUNTLAND .........15

Qodobka 20-aad: Barre..............................................................................................16

Qodobka 21-aad: Waajibaadka Baraha ......................................................................16

Qodobka 22-aad: Xuquuqda Baraha ..........................................................................17

Qodobka 23-aad: Diiwaanka Barayaasha ...................................................................17

Qodobka 24-aad: Diiwaan-Gelinta Barayaasha ..........................................................18

Qodobka 25-aad: Wargelinta Wax-Dhigidda ama Ka Tagidda Shaqo Ee Baraha.............18

Qodobka 26-aad: Horumarinta Barayaasha Qur'aanka Kariimka..................................18

Qodobka 27-aad: Ururka Barayaasha Qur'aanka Kariimka .........................................18

.............................................................................................................................19





GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 28-aad: Sharcinnimada Ururka........................................................................
CUTUBKA 5-AAD: GARAACIDDA CARUURTA EE GOOBAHA ....................................................19
BARASHADA QUR'AANKA (DUGIYADA) ............................................................................20
Qodobka 29-aad: Qeexidda Garaacidda Caruurta.............................................................20
Qodobka 30-aad: Reebnaanta Garaacidda Caruurta ee Goobaha Barashada Qur'aanka kariimkan ah ........................................................................................................20
Qodobka 31-aad: Ciqaabta ................................................................................................20
Qodobka 32-aad: Maxkamadda Awooda u Leh Qaadista/Dhagaysiga Dacwadaha La Xiriira Garaacidda Caruurta ee Goobaha Barashada Qur'aanka Kariimka ah (Dugsiyada)................21
CUTUBKA 6-AAD: QODOBBO QUBANE AH.......................................................................21
Qodobka 33-aad: Dembiyada La Xiriira Diiwaan-Gelinta Dugsiyada Qur'aanka......................21
Qodobka 34-aad: Fasaxyada................................................................................................21
Qodobka 35-aad: Xeer-Nidaamiye .......................................................................................22
Qodobka 36-aad: Burin .......................................................................................................22
Qodobka 37-aad: Dhaqan Galka Xeerka.................................................................................22

# CUTUBKA 1-AAD
# QODOBO GUUD

## Qodobka 1-aad
## Eray Bixin

Ereyada hoos ku qoran haddii aan xeerkan si kale u qeexin waxaa loola jeedaa:

**"Xeer"**: waxaa loola jeeda Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariim ah ee Puntland.

**"Dawladda Puntland"**: Waxaa loola jeedaa dawladda Puntland ee Soomaaliyeed sida ku cad Qodobka 1-aad ee Dastuurka Puntland.

**"Dastuurka"**: Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee la ansixiyay 2012.

**"Wasiir"**: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka Iyo Dhaqancelinta ee Puntland

**"Wasaradda"**: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka iyo Dhaqan-celinta ee Puntland.

**"Agaasimaha Guud":** Waxaa loola jeeda agaasimaha guud ee Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka iyo Dhaqan-celinta ee Puntland.

**"Waax"**: Waxaa loola jeedaa Waaxda Arrimaha Diinta ee Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka Iyo Dhaqancelinta ee Puntland.

**"Dugsi"**: Waxaa loola jeeda goob waxbarasho Qur'aan kariimka ah (Malcaamad).

**"Maxkamadda"**: Waxaa loola jeedaa Maxkamadaha Dawladda Puntland sida darajada kowaad, labaad iyo Maxkamadda sare.

**"Sharci-Yaqaan":** Waxaa loola jeeda qof haysta ugu yaraan shahaadada heerka koowaad ee Shareecada ama Qaanuunka midkood.

**"Guddi":** Waxaa loola jeedaa Guddiga Dugsiyada Qur'aanka kariim ah

**"Xafiis":** Waxaa loola jeedaa Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-Siinta Dugsiyada Qur'aanka kariimka ah.

**"Ruqsad"**: Waxaa loola jeedaa shahaadada cadaynaysa oggolaanshaha furashada Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**"Ilmaha (caruur)":** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo shan iyo toban sano (15) ka yar sida ku cad Dastuurka Puntland Qodobka 31-aad faqradiisa 1-aad.

**"Urur":** Waxaa loola jeedaa Ururka Barayaasha Qur'aanka ee Puntland.

**"Bare":** Waa gudbiye ama barbaariye wax ka dhiga goob waxbarasho, Si gaar ah Xeerkan gudihiisa waxaa loola jeeda Bare qof kasta oo wax ka dhiga Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.

**"Waalid":** Waa lammaanaha ardayga dhalay ama midkood, ama qof kasta oo soo koriyey ama sifo kale oo sharci ah uga mas'uul ah.

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland.

## Qodobka 4-aad
## UJeeddada Xeerka

Ujeedooyinka Xeerkan waa;

1. In la helo xeer lagu nidaamiyo Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.
2. In la tayeeyo barashada Qur'aanka Kariimka ah , iyadoo la tixraacayo Dastuurka Puntland Qodobka 32-aad faqradiisa 5-aad.
3. In kor loo qaado qawlka Eebbe (Qur'aanka).
4. In la xoojiyo xiriirka wada shaqeyneed ee Wasaaradda Caddaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka Iyo Dhaqan-celinta iyo goobaha barashada Qur'aanka kariimka ah (Dugsiyada).



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

5. Dhiirri-gelinta barashada iyo ku-dhaqanka Diinta Islaamka, Caqiidada toosan iyo anshaxa wanaagsan.
6. In kor loo qaado tayada barayaasha Qur'aanka Kariimka ah si loo helo Barayaal xirfad iyo aqoon leh.

## Qodobka 5-aad
## Mabaadii'da Guud ee Xeerka

Xeerka Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah wuxuu ku dhisan yahay mabaadi'da hoos ku qoran;

1. Shareecadda Islaamka waa sharciga dalka ugu sarreeya, waxaana reebban wixii xeer ah ee ka soo horjeeda sida uu dhigayo Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 9-aad, faqradiisa 4-aad.
2. Tayeynta iyo kor u qaadista qawlka Eebe/Allaah سبحانه وتعالى.
3. Xaqa furashada Dugsiyo Qur'aan si waafaqsan xeerkan.
4. Dhiirri-gelinta xuquuqda aadamaha, Sarraynta Sharciga, caddaaladda, hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo daah-furnaan.
5. Ilmo (cunug) kasta waxa uu xaq ugu leeyahay waalidkiisa iyo dawladda Puntland waxbarasho & barbaarin.

## Qodobka 6-aad
## Madax-Bannaanida Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah

Dugsiyada Qur'aanku waxa ay leeyihiin madax-bannaani, Wasaaradduna waxa ay mas'uul ka tahay la socodka, kormeerka iyo qiimaynta tayada waxbarasho ee goobahaas.

## Qodobka 7-aad
## Fasiraadda Xeerka

1. Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Dawladda Puntland.
2. Wixii muran sharciyadeed ah ee ka dhasha xeerkan waxaa lala kaashanayaa sharciyaqaano ama waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda si ay u fasirto.



XERYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 2-aad
# MAAMULKA DUGSIYADA QUR'AANKA
## Qodobka 8-aad
## Wasaaradda Cadaaladda

1. Wasaaraddu waxay siinaysaa Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah taageero iyo wixii kale ee kaalmo ah ee ay awooddo hadba sida ay ku habboon tahay sida ku cad Dastuurka Puntlad Qodobka 32-aad faqradiisa 5-aad.
2. Wasaaraddu waxay dhiirri-gelisaa Dugsiyada Qur'aanka, si ay u gaaraan heerka waxbarasho ee laga rabo, una noqdaan kuwa isku filan.
3. Si gaar ah Wasaaraddu waxay samaynaysaa; -
   - b) Dajinta siyaasadda lagu hagayo Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.
   - t) Dajinta Xeerarka lagu nidaaminayo barashada Qur'aanka Kariimka ah.
   - j) Tirakoobka Dugiyada Qur'aanka Kariimka ah.
   - x) Kormeero joogto ah lixdii (6) biloodba mar, si loo hubiyo tayada dugsiyada qur'aanka kariimka ah.
   - Kh) Fulinta guud, fulinta heer degmo waxaa yeelanaya Degmada (Dawladda Hoose).

## Qodobka 9-aad
## Guddiga Dugsiyada Qur'aanka

Guddigan wuxuu ka shaqeynayaa, islamarkaana go'aan ka gaarayaa dhammaan danaha Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland.

## Qodobka 10-aad
## Dhismaha Guddiga

1. Wasaaraddu waxay dhisaysaa Guddiga Dugsiyada Quraanka.
2. Guddiga Dugsiyada Qur'aanku wuxuu hoos imaanayaa Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka iyo Dhaqan-celinta ee Puntland.
3. Guddigu wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo kala ah;

**b)** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka iyo



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND — STATE GENERAL SOLICITOR

dhaqan-celinta ee Puntland (Guddoomiye).

**t)** Agaasimaha Waaxda Diinta ee Wasaaradda Caddaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka iyo Dhaqan-celinta ee Puntland (Guddoomiye ku xigeen).

**j)** Agaasime waaxeedka waxbarashada tooska ah ee Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare ee Puntland (Xubin).

**x)** Gudoomiyaha Ururka Barayaasha Qur'aanka kariimka ah (xubin).

**kh)** Labo xubnood oo ka socoda Ururka Barayaasha Qur'aanka kariimka ah.

**d)** Xubin ka socota walidiinta.

**r)** Labo xubnood oo ka imanaya Cullimada.

## Qodobka 11-aad.
## Waajibaadka Guddiga

Guddigu wuxuu u xil saaran yahay;

1. Kala talinta Wasaaradda arrimaha Dugsiyada Qur'aanka kariimka ah.
2. Isku xirka Wasaaradaha Waxbarshada, Cadaaladda iyo Dugsiyada Qur'aanka.
3. Inuu kormeer ku sameeyo Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.
4. Diyaarinta warbixin sanadeed lagu qiimaynayo Dugsiyada horumarkooda iyo caqabadihii soo wajahay.
5. Qiimaynta iyo diyaarinta warbixin ku saabsan Dugsiyada cusub ee la diiwaangelinayo, kuwa jiray ee Ruqsadda shaqo loo cusboonaysiinayo, kuwa laga laalayo Ruqsada haddii uu u baahdo Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsadsiinta Dugsiyada Qur'aanka sida ku cad Qodobka 15-aad faqradiisa 1-aad xarafka (j) ee xeerkan.
6. Guddigani fadhigiisa koowaad waxa uu samaysanayaa xeerhoosaad lagu maamulo shaqada Guddiga.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 3-AAD
# XAFIISKA DIIWAAN-GELINTA IYO RUQSADSIINTA DUGSIYADA QUR'AANKA

## Qodobka 12-aad
## Qaab dhismeedka Xafiiska Diiwaan-Gelinta Iyo Ruqsad Siinta Dugsiyada Qur'aanka

1. Wasaaraddu waxay samaynaysaa Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka.
2. Xafiisku wuxuu qaabilsan yahay diiwaan-gelinta Dugsiyada, Ruqsad siintooda, cusboonaysiinta Ruqsadaha, laalista Ruqsadaha haddii loo baahdo iyo diiwaangelinta Barayaasha Qur'aanka.
3. Xafiiska Diiwaan-gelinta Iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanku wuxuu hoos imaanayaa Waaxda Arrimaha Diinta ee Wasaaradda Cadaaladda.
4. Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-Siinta Dugsiyada Qur'aanka wuxuu ka kooban yahay saddex (3) xubnood oo kala ah;
   **b)** Agaasimaha Waaxda Diinta ee Wasaaradda Cadaaladda (Gudoomiye).
   **t)** Madax qaybeedka Dugsiyada iyo Masaajidda ee Waaxda Arrimaha Diinta ee Wasaaradda Cadaaladda (Gudoomiye ku xigeen).
   **j)** Madax qaybeedka Dacwadda Iyo Fatwada ee Waaxda Arrimaha Diinta ee Wasaaradda Cadaaladda (Xubin).

## Qodobka 13-aad
## Diiwaan-Gelinta Dugsiyada

1. Dugsiyada Qur'aanka waxay iska diiwaan galiyaan Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka.
2. Xeerkan waxa uu siinayaa mulkiilayaasha ama wakiiladda Dugsiyada Qur'aanka muddo sagaashan (90) casho/maalmood ah, dhaqan galka xeerkan kadib, si ay isu soo diiwaan-galiyaan.
3. Mulkiilaha ama wakiilka Dugsi ee ku guul daraysta diiwaangelinta dugsigiisa waxaa laga qaadayaa ganaax lacageed oo dhan $ 50 ama shilin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 14-aad
## Shuruudaha Diiwaan-Gelinta Dugsiyada

**1.** Xafiiska diiwaan-gelinta wuxuu diiwaan-gelin karaa Dugsi Qur'aan, marka uu codsaduhu fuliyo shuruudaha hoos ku qoran; -

**b)** Waa inuu haystaa goob waxbarasho ku habboon.

**t)** Waa inuu buuxiyaa shuruudaha qaadashada Baraha ee ku xusan Qodobka 20-aad ee Xeerkan.

**j)** Waa inuu diyaar u yahay in uu ku dhaqmo oo uu fuliyo siyaasadda, xeerarka, nidaamka iyo go'aannada waxbarashada ee Dawladda Puntland iyo shuruucda kale ee dalka u degsan.

**x)** Waa inuu haystaa magac la oggol-yahay oo waafaqsan xeerka.

**kh)** Waa inuu diyaar u yahay in goobta dugsiga laga furayo lala soo qiimeeyo.

**d)** Waa inuu keenaa xogta dugsiga cusub oo dhammaystiran (Madrasa Profile).

**r)** Waa inuu soo gudbistaa waraaq codsi ah.

**s)** Waa inuu bixiyaa khidmadda is-diiwaangalinta.

**2.** Khidmadda is-diiwaangelinta Dugsiyada Qur'aanka waa $5 ama shilin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 15-aad
## Habraaca Diiwaan-Gelinta Dugsiyada Iyo Ruqsad-Siintooda

**1- Habraaca Diiwaan-galinta Dugsiyada Cusub**

**b)** Dugsi Qur'aan lama furi karo haddii aan laga diiwaan-gelin Xafiiska Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka ee Wasaaradda.

**t)** Codsiga diiwaan-gelinta waa in loo gudbiyaa Xafiiska Diiwaan-gelinta oo u xilsaaran diiwaan-gelinta Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah.

**j)** Kadib marka Xafiiska u xilsaaran Diiwaan-gelinta Dugsiyadu hubiyo in shuruudihii diiwaan-gelinta Dugsiyada ee ku xusnaa Qodobka 14-aad la buuxiyay, waa in uu soo qiimeeyo goobta iyo xogta uu bixiyay Mulkiilaha ama qofka Mas'uulka ka ah Dugsiga.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

Haddii xafiisku ku tala bixiyo in la siiyo mulkiilaha ama wakiilka dugsiga ruqsadda diiwaangelinta Dugsiga waa in ay u gudbiyaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda.

**x)** Ruqsadsiinta Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah waa lacag la'aan marka uu dugsigu buuxiyo shuruudaha ku xusan Qodobka 14-aad ee xeerkan.

**Kh)** Agaasimaha Guud marka uu ku qanco tala bixinta Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-Siinta Dugsiyada Qur'aanka, wuxuu diyaarinayaa Ruqsadda diiwaan-gelinta dugsiga, wuxuuna u gudbinayaa Wasiirka oo yeelanaya saxiixa u dambeeya.

**2- Diiwaan-Gelinta Dhammaystiran**

**b)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-Siinta Dugsiyada Qur'aanka ee Wasaaradda marka uu helo codsiga diiwaan-gelinta, sameeyana wixii baaritaan ah ee loo baahnaa, kuna qanco in shuruudihii diiwaan-gelinta la buuxiyey, wuxuu siinayaa Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsi Ruqsadda diiwaan-gelinta iyo ku shaqaysiga xirfadda Bare Qur'aan oo dhamaystiran, marka uu diyaariyo Agaasimaha Guud, Wasiirkuna saxiixo.

**t)** Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsi waa in uu nuqulka Ruqsadda diiwaan-gelinta ee waafaqsan Qodobka 15-aad Faqradiisa 2-aad Xarafka (b) ku dhejiyaa meel la arki karo oo ka mid ah Dugsiga.

**j)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waa in uu diyaariyaa:

i. Foomka diiwaan-gelinta Dugsiyada cusub.

ii. Foomka Ruqsadda.

**x)** Degmadu waxay yeelanaysaa Ruqsadda furashada goobta Dugsi Qur'aan oo ay bixinayso Dawladda Hoose ee degmada.

**Kh)** Xafiiska Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waa in uu xafiis ku yeeshaa Gobollada, si uu u fududeeyo Diiwaangelinta iyo Ruqsad-siinta dugsiyada.

**3- Habraaca Cusboonaysiinta Ruqsadda ee Dugsiyada Shaqaynaya**

**b)** Dugsi Qur'aan ma shaqayn karo haddii aanu cusboonaysiisan Ruqsaddiisa.

**t)** Dugsi kasta oo horay u jiray waxaa Ruqsada loo cusboonaysiinayaa (3) saddexdii sanaba mar.

**j)** Si loogu cusboonaysiiyo Ruqsadda, Dugsigu waa in uu keeno warbixin koobaysa dhammaan horumarkii Dugsiga, caqabadihii soo maray, qaabkii uu u xalliyey iyo wixii tala bixin ah.

**x)** Warbixinta waa in lagu soo lifaaqaa;

i. Nuqul Ruqsaddii hore ah.

ii. Warqad codsi ah ee Dugsiga doonaya in loo cusboonaysiiyo ruqsadda.

**Kh)** Marka uu xafiiska diiwan-gelintu helo dhammaan warbixinaha iyo lifaaqa warbixinta ee ku cad Qodobkan Farqadiisa 3-aad Xarafka (j), waa in ay dugsiga siiyaan warqad caddayn ah.

**d)** Dugsigu isaga oo sita warqadda caddaynta Xafiiska Diiwan-Gelinta waa in uu bixiyaa lacagta Ruqsad Badelka kuna soo bixiyaa Wasaardadda Maaliyadda Dawlada Puntland.

**r)** Lacagta Ruqsad bedelka waa $30 ama Shilin Soomaali u dhigma.

**s)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka marka uu helo:

i. Nuqul ruqsaddii hore ah.

ii. Warqad codsi ee Dugsiga doonaya in loo cusboonaysiiyo Ruqsadda.

iii. Warqadda bixinta lacagta Ruqsad Bedelka.

iv. Warbixin koobaysa dhammaan horumarkii dugsiga, caqabadihii soo maray, qaabkii uu u xalliyey, waa in uu Xafiiska Diiwaan-gelinta warbixinta oggolaanshaha Ruqsad cusboonaysiinta u gudbiyaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda.

**Sh)** Agaasimaha Guud isaga oo tixraacaya go'aanka Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waxa uu bixinayaa Ruqsadda Dib-u-cusboonaysiinta Dugsiga.

**Dh)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka haddii uu u baahdo waxa uu qiimayn ku samayn karaa Dugsiga doonaya in loo cusboonaysiiyo Ruqsadda iyada oo la eegayo dhammaan arrimahan;

i. Habka waxbarista iyo dhigista.

ii. Deegaanka waxbarasho ee Dugsiga.

iii. Tayada dhismaha Dugsiga iyo

iv. Wixii kale ee mas'uuliyiinta Wasaaradda u arkaan in ay muhiim u tahay in la qiimeeyo.

**(c)** Xafiiska Diiwaan-gelinta Dugsiyadu waxa uu adeegsan karaa khuburo hawlaha uu



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

uga maarmi waayo qiimayntooda.

**g)** Xafiisku wuxuu diyaarinayaa; -

i. Foomka Ruqsad cusboonaysiinta.

ii. Foomka Warbixinta Dugsiyada.

## Qodobka 16-aad
## Reebnaanta Xayeysiisyada Dugsiyada Aan Is-diiwaan Gelin

1. Qofna uma bannaana in uu ku muujiyo Dugsi Qur'aan xayeysiis, warbixin qoraal ah ama wixii kale ee la mid ah, haddii uusan haysan diiwaan-gelin dhammaystiran oo ku soo baxday si waafaqsan Qodobka 15-aad Faqradiisa 2-aad
2. Qof kasta oo jabiya Faqrada 1-aad ee Qodobkan waxa uu galayaa fal-dambiyeed, haddii uu ku cadaado ay ciqaabtiisu tahay ganaax lacageed oo dhan $70 ama Shilin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 17-aad
## Laalista Ruqsadaha iyo Habraacooda

Si waafaqsan xeerkan, Xafiis ka Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waxa uu laali karaa Ruqsadda Diiwaan-Gelinta Dugsi Qur'aan, haddii uu ku qanco in ay jiraan arrimahan hoos ku qoran; -

1. Goobta (Dugsiga) oo ah mid aan ku habboonayn waxbarasho.
2. Diiwaan-gelinta Dugsiga oo ah mid lagu helay si baal-marsan Xeerka.
3. Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsiga oo ah mid faafinaya dhaqamo iyo caadooyin ka soo horjeeda Shareecada Islaamka iyo dhaqanka suubban ee Soomaaliyeed.
4. Dugsiga oo aan waxbarasho ka socon muddo sannad ah.
5. Dugsiga oo faafinaya waxyaabo lid ku ah nabadgelyada iyo xasiloonida deegaannada Puntland iyo guud ahaan Dalka Soomaaliya.
6. Dugsiga oo aan u hoggaansamin go'aannada maamul ama joojiya xiriirka wada shaqeyneed ee Wasaaradda Cadaaladda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 18-aad
## Habraaca Laalidda Ruqsadda Diiwaangelinta Dugsi

1. Guddiga Dugsiyada Qur'aanka ayaa qiimayn dhab ah ka soo qoraya Dugsiga, iyaga oo qiimaynaya arrimaha ku xusan Qodobka 17-aad Faqradiisa 1-aad.
2. Haddii warbixinta Guddiga Dugsiyada Qur'aanka lagu caddeeyo in aan Dugsigu u qalmin in uu sii wado waxbarista, Xafiiska Diiwaan-gelinta Iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka ayaa guddi ahaan ku soo qiimaynaya xaaladda dhabta ah ee haysata Dugsiga, iyaga oo tix-raacaya go'aanka Guddiga Dugsiyada Qur'aanka.
3. Haddii guddiga Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka xaqiijiyaan warbixinta Guddiga Dugsiyada Qur'aanka, Xafiiska Diiwaangelintu waxa uu laalayaa Ruqsadda Diiwaangelinta Dugsiga.
4. Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsi waa in la siiyaa fursad uu isku difaaco intaan la go'aamin laalidda Ruqsadda Diiwaan-gelinta.
5. Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsi waa in qoraal lagu siiyo go'aanka Ruqsad-Laalidda.
6. Marka uu helo Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsiga go'aanka Ruqsad-Laalidda waa in uu muddo soddon cisho (30) gudahood ah cabasho ugu gudbiyaa Agaasimaha Guud, Agaasimaha Guud waa in uu cabashada go'aan kaga gaaraa toban cisho (10) gudahood.
7. Haddii dhibanuhu ku qanci waayo go'aanka Agaasimaha Guud waxa uu cabashadiisa u gudbinayaa Wasiirka, Wasiirku waa in uu cabashada toddoba cisho (7) gudahood go'aan kaga gaaraa.
8. Haddii aan Mulkiiluhu ama Wakiilka Dugsiga cabasho ka soo gudbin go'aanka ruqsad-laalidda muddo ka badan soddon (30) cisho, Wasaaradda Caddaaladda ayaa xil ka saaran yahay mustaqbalka Dugsigai
9. Go'aanka Ruqsad-Laalidda waa in lagu baahiyaa qoraal rasmi ah oo ka soo baxay Wasaaradda.
10. Haddii ay soo baxaan arrimo u baahan magdhow waxa ka mas'uul ah Mulkiilaha ama qofka Mas'uulka ka ah Dugsiga ee Ruqsaddiisa la laalay.
11. Ma noqonayso laalidda ruqsadda diiwaangelinta Dugsi Qur'aan mid dhaqangal ah ah;



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

**b)** Haddii aan Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsiga la siin ogeysiis ka yimid Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka oo ay ku cad yihiin sababaha Ruqsad laalidda ee ku cad Qodobka 17-aad.

**t)** Haddii aan Mulkiilaha ama Wakiilka Dugsiga la siin fursad uu isku difaaco intaan la go'aamin laalidda Ruqsadda diiwaan gelinta sida ku cad Qodobkan Faqradiisa 4-aad.

**j)** Haddii aan Mulkiilaha ama qofka Mas'uulka ka ah Dugsiga looga jawaabin cabashadiisa sida ku cad Qodobkan Faqradiisa 6-aad.

## Qoddobka 19-aad
## Beddelka Magaca Dugsiga Iyo Habraaciisa

**1. Beddelka Magaca Dugsiga**

**b)** Magaca dugsiga waxa iska leh Dugsiga loo diiwaangaliyey, haddii aan lagaga qaadin go'aan ka soo baxay hay'ad awood sharci u leh.

**t)** Waxaa reebban in la beddelo magaca Dugsiga haddii aan oggolaansho laga haysan Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka ee Wasaaradda Cadaaladda.

**j)** Waxa reebban in ruqsad Dugsi leeyahay lagu furto Dugsi kale.

**Kh)** Waxa reebban in Dugsiga Qur'aan ee Ruqsadda lagu siiyey barista iyo dhigidda Qur'aanka Kariimka ah loo beddelo iskuul ama wax la mid ah.

**2. Habraaca Magac Beddelka**

**b)** Codsiga magac ama rug beddelka waa in lagu soo hagaajiyo xafiiska u xilsaaran diiwaan-gelinta dugsiyada Qur'aanka oo ay ku lifaaqan yihiin;-

i. Warqadda Diiwaan-gelinta Dugsiga oo aan dhacsanayn.
ii. Mulkiyadda lahaanshaha Dugsiga.
iii. Sababta loo beddelayo magaca iyo
iv. Magaca cusub.

**t)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waxa uu go'aan ka soo saarayaa oggolaashaha magac beddelka qiimayn kadib.

**j)** Haddii Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka go'aamiyaan in loo oggolaado magac beddelka, waa in ay go'aanka oggolaanshaha



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

u gudbiyaan Agaasimaha Guud ee Wasaaradda.

**x)** Agaasimaha Guud waa in uu siiyaa mulkiilaha Shahaadada magac beddelka.

**Kh)** Haddii xafiiska diiwaan-gelinta go'aamiyaan in aan la beddelin magaca Dugsiga, waa in ay go'aanka u gudbiyaan Agaasimaha Guud, nuqul ka mid ahna la siiyaa mulkiilaha ama Wakiilka Dugsiga.

**d)** Haddii mulkiiluhu go'aanka diidmada dacwad ka qabo waa in uu muddo toban (10) cisho gudahood cabasho u gudbiyaa Agaasimaha Guud.

**r)** Agaasimaha Guud haddii uu ku qanci waayo asbaabta cabashada waxa uu warqad ku soo saarayaa in aan la beddeli karin magaca Dugsiga. Haddii uu ku qanco asbaabta cabashada waa in uu dib ugu celiyaa Xafiiska Diiwan-gelinta si ay qiimayn labaad u sameeyaan.

**s)** Agaasimaha Guud isagoo tixgelinaya go'aanka dib u qiimaynta Xafiiska Diiwaangelinta, waxa uu go'aan ka gaarayaa arrinka magac beddelka.

**Sh)** Hadddii uu dhibanuhu ku qanci waayo go'aanka Agaasimaha Guud waxa uu cabashadiisa u gudbinayaa Wasiirka. Wasiirku waa in uu cabashada muddo shan iyo toban (15) cisho gudahood go'aan kaga gaaraa.

**Dh)** Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waxay diyaariyaan Ruqsadda magac beddelka.

## CUTUBKA 4-AAD
## URURKA BARAYAASHA QUR'AANKA KARIIMKA AH EE PUNTLAND

## Qodobka 20-aad
## Bare

**Shuruudaha Qaadashada Baraha.**

Qof kasta oo raba in uu bare ka noqdo Dugsi Qur'aan oo diiwaan-gashan waa in uu buuxiyaa shuruudaha hoos ku qoran; -

**b)** Waa in uu qori karaa, akhrina karaa af-Soomaaliga

**t)** Waa inuu yaqaanaa axkaamta Quraanka Kariimka ah (ألتجويد)

**j)** Waa inuu xifdisan yahay ugu yaraan saddexda (3) jus ee Qur'aanka ugu hooseeya) من جزء عم الى سورة المجادلة

x) Waa inuu haystaa shahaado Dugsi hoose, ama wax u dhigma.

Kh) Waa inuu u tababaran yahay macalinimo.

d) Waa inuu leeyahay akhlaaq fiican iyo dhaqan suubban.

r) Waa in aan horay ugu dhicin xukun ciqaabeed kama-dambays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sano ee ugu dambaysay.

s) Waa in uu fayow-yahay maskax ahaan iyo jir ahaanba, sidoo kale uusan lahayn iin culus oo wax u dhimi karta gudashada xilkiisa.

Sh) Waa in aanay da'diisu ka yarayn 18 sanno.

## Qodobka 21-aad
## Waajibaadka Baraha

Waajibaadka baruhu waa; -

b) Waxbaridda iyo barbaarinta Ardayda.

r) Hagaajinta akhlaaqda Ardayga.

j) Qiimaynta waxbarashada Ardayga.

x) Ilaalinta nabadgelyada Ardayga fasalka dhexdiisa iyo

Kh) Wixii kale ee waajibaad ah ee ku cad Xeerkan.

## Qodobka 22-aad
## Xuquuqda Baraha

Baruhu waxa uu xaq u leeyahay;

b) Helidda mushaharkiisa.

t) Helidda tababarro kor loogu qaadayo xirfadiisa shaqo.

j) Inuu tix-galin ka helo ardaydiisa, waalidka iyo qaybaha kale ee bulshada.

x) Macalinku wuxuu yeelanayaa xuquuq buuxda bisha fasaxa ah sida, mushaharkiisa iyo wixii lamidka ah.

Kh) Wixii kale oo tageero ah ee Xeerkani siinayo.

## Qodobka 23-aad
## Diiwaanka Barayaasha

Xafiiska Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Dugsiyada Qur'aanka waa inuu sameeyaa Diiwaanka Barayaasha, kaas oo ay tahay in la geliyo dhammaan macluumaadka Barayaasha si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 24-aad
## Diiwaan-Gelinta Barayaasha

Xafiiska diiwan-gelinta kadib marka uu helo codsi diiwaan-gelineed oo si sharci ah loo sameeyey, uuna sameeyo wixii baaris ah ee loo baahan yahay, waa in uu diiwaangeliyaa Bare kasta oo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 20-aad ee xeerkan, kadibna siiyaa kaarka aqoonsiga Barenimo. (Teacher ID).

## Qodobka 25-aad
## Wargelinta Wax-Dhigidda ama Ka Tagidda Shaqo Ee Baraha

Bare kasta oo diiwaan-gashan waa in uu muddo shan iyo toban cisho (15) gudahood oo ka bilaabmanaysa marka uu shaqada bilaabay ama marka uu ka tagay ku wargeliyaa Xafiiska Diiwaan-gelinta, qoraal ahaan magaca Dugsiga ee uu wax ka dhigo ama uu ka tagay iyo waqtiga uu bilaabay wax-dhigidda ama uu ka tagay.

## Qodobka 26-aad
## Horumarinta Barayaasha Qur'aanka Kariimka

1. Wasaaraddu waxay Barayaasha Qur'aanka Karimka ah siinaysaa tababarro si loo helo barayaal xirfad leh.
2. Wasaaraddu waxay Barayaasha Qur'aanka Kariimka ah siinaysaa wixii tageero ah ee ay u baahan yihiin Wasaaradduna ay awoodo.

## Qodobka 27-aad
## Ururka Barayaasha Qur'aanka Kariimka Ah

1. Barayaasha Qur'aanka Kariimka ah waxay dhisanayaan urur ay ku midaysan yihiin.
2. Ururka waxaa loogu yeerayaa "Ururka Barayaasha Qur'aanka Kariimka ah ee Puntland".
3. Ururku fadhigiisa koowaad waxay qoranayaan xeer hoosaadka lagu nidaaminayo ururka.
4. Xeer-hoosaadka Ururka waa in ay ku cad-yihiin; -
   b) Magaca ururka oo dhamaystiran.
   t) Ujeeddooyinka Ururka.
   j) Qaab-dhismeedka Ururka iyo waaxyaha uu ka kooban yahay.
   x) Xarunta dhexe ee Ururka.
   kh) Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee mas'uuliyiinta Ururka.
   d) Shuruudaha xubinta lagu noqon karo, sababaha lagu waayi karo iyo is-casilaadda xubinta ama mas'uulka.
   r) Qodobo khuseeya sida Xeer-Hoosaadka Ururka wax looga beddeli karo.

## Qodobka 28-aad
## Sharcinimada Ururka

1. Ururka Barayaasha Qur'aanka Kariimka ah wuxuu sharci noqonayaa markii dawladda Puntland ku aqoonsato dekreeto uu soo saaro wasiirka Wasaaradda Cadaaladda.
2. Uruku wuxuu yeelanayaa shakhsiyad Qaanuuneed qoraalka rasmiga ah ee Wasiirka kadib.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 5-aad
# GARAACIDDA CARUURTA EE GOOBAHA BARASHADA QUR'AANKA (DUGIYADA)
## Qodobka 29-aad
## Qeexidda Garaacidda Caruurta

Waa nooc ciqaabeed la adeegsanayo awood jireed (physical force), ujeedkuna yahay in la xanuunjiyo ilmaha (ardayga) ha yaraado ama ha waynaado, sida in la feero, la laado, la qaniino, la tuuro ama loo adeegsado aalad sida; ul, jeedal iyo wax lamid ah taas oo sababta dhaawac soo gaara ilmaha (ardayga).

## Qodobka 30-aad
## Reebnaanta Garaacidda Caruurta ee Goobaha Barashada Qur'aanka kariimka ah (Dugsiyada)

1. Ilmuhu (cunugu) waxa uu xaq u leeyahay in loo muujiyo ixtiraam iyo qaderin shakhsiyadeed, waxaa reebban dhammaan wixii ficil ama hadal ah oo wax u dhimaya maankiisa iyo jirkiisa.
2. Waxaa reebban dhammaan noocyada kala duwan ee garaacidda caruurta ee goobaha barashada Qur'aanka Kariimka ah (Dugsiyada), kuwaas oo gaarsiisan dhaawac fudud iyo dhaawac culus ilaa geeri.
3. Edbinta caruurta (Disciplinary measures) waa in loo maraa sifo waafaqsan Xeerka.

## Qodobka 31-aad
## Ciqaabta

Barihii (macalinkii) ay ku cadaato inuu cunug (arday) u gaystay garaacista lagu mamnuucay xeerkan Qodobkiisa 30-aad faqradiisa 2-aad waxaa ciqaabtiisa loo marayaa Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 32-aad
## Maxkamadda Awooda u Leh Qaadista/Dhagaysiga Dacwadaha La Xiriira Garaacidda Caruurta ee Goobaha Barashada Qur'aanka Kariimka ah (Dugsiyada)

Dacwadaha la xiriira garaacidda caruurta ee goobaha barashada Qur'aanka Kariimka ah (Dugsiyada) waxaa qaadisteeda iska leh Maxkamada Darajada Koowaad, iyadoo dacwadda uu soo gudbinayo ilmaha dhibaatadu soo gaartay ama waalidka ilmaha ama cidda markaas mas'uuliyadda ilmaha iska leh.

# CUTUBKA 6-aad
# QODOBBO QUBANE AH

## Qodobka 33-aad
## Dembiyada La Xiriira Diiwaan-Gelinta Dugsiyada Qur'aanka

Qof kasta oo mas'uul ka ah maamulka Dugsi Qur'aan oo ku hela diiwaanka goobta (Dugsiga) sifo baal-marsan sharciga waxa uu galayaa fal-dembiyeed, haddii ay ku cadaato ciqaabtiisu tahay ganaax lacageed oo dhan $ 500 ama shilin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 34-aad
## Fasaxyada

1. Marka laga reebo fasaxyada Ciidaha iyo kuwa Asbuuca ee ummadda muslimka ahi leedahay, Dugsiyada Qur'aanka Kariimka ah waxay yeelanayaan Bil fasax ah sanadkiiba.
2. Fasaxa lagu sheegay Qodobkan Faqradiisa 1-aad waxaa jaangoyntiisa iska leh Baraha (macalinka) asagoo kala tashanaya Waalidiinta Ardayda uu waxbarayo.
3. Macalinku wuxuu yeelanayaa xuquuq buuxda bisha fasaxa ah sida, mushaharkiisa iyo wixii la midka ah.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 35-aad
## Xeer-Nidaamiye

Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda, Arrimaha Diinta, Dastuurka Iyo Dhaqancelinta ee Dawladda Puntland, wuxuu awoood u leeyahay inuu soo saaro xeer-nidaamiye dawladeed oo lagu fasirayo laguna fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 36-aad
## Burin

1. Xeerkani wuxuu burinayaa xeer kasta oo la xiriiray Dugsiyada Qur'aanka oo ka hor imaanaya axkaamta ku xusan Xeerkan.
2. Qodobada ku xusan Xeerka Ciqaabta guud, Habka Ciqaabta, Xeerka Madaniga iyo habraaciisa iyo dhammaan Xeerarka kale ee xiriirka la leh, kuwaas oo aan ka hor imaanayn axkaamta xeerkan waa la dabakhayaa marka la fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 37-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo, laguna Soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLA...
STATE GENERAL SOLICITOR